# Su’aalaha Inta badan La iska weydiiyo Ka dhaafidda Warqadda wakhtiga ee Soogalista PSW ee Gacanta lagu qoro

Nooca Maarso 2021

## Waa maxay Ka dhaafidda Warqadda wakhtiga ee Soogalista PSW ee Gacanta lagu qoro?

Heshiiska Gorgortanka ah ee Wadajirka ah(Collective Bargaining Agreement (CBA) ee 2019-2021, Qodobka 8aad, Faqrada 3aad, waxaa Shaqaalaha Kaalamada Shakhsiga bixiya laga doonayaa in ay si toos ah wakhtigooda uga soo galaan eXPRS ayaka oo isticmaalaya Hanaanka eXPRS Mobile-EVV Solution. Marka la isticmaalayo EVV (ayada oo laga baxayo lana soo galayo marka la shaqaynayo), wakhtiga waxaa si toos ah loo galinayaa eXPRS asaga oo ah Kumeelgaar. PSW waxay intaa kaddib kaliya u baahan tahay in ay u gudbiso wakhtiyadaas lasoo galiyay ee Kumeelgaarka ah Kuwo Aan dhammaystirnayn. Isticmaalka EVV waa mid la iska rabo, haddi PSW uu u baahan yahay in laga dhaafo EVV, waxaa lagu go’aaminayaa eXPRS dhexdiisa (SC ayaa codsiga u buuxin kara Shaqaalaha Kaalmada Shakhsiga(PSW) bixiya). Si kastaba ha ahaatee, ka dhaafidda isticmaalka EVV meesha kama saarayso shuruudda PSW-ga ee ah in uu galo eXPRS uuna galiyo wakhtigiisa asaga oo gacanta isticmaalaya (badalkii uu EVV u galin lahaa) uuna u gudbiyo marxaladda Aan dhammaystirnayn.

CBA wuxuu qeexayaa xaaladaha markaasi looga dhaafaayosi kumeelgaar ah shuruuddaan (in wakhtiga eXPRS la galiyo ayada oo gacanta la isticmaalayo) ay waajib tahay in la helo. CDDP waa in ay leedahay xeer iyo hanaan ay ku bixinayso ka dhaafidda shuruudaha PSW ay si toos ah wakhtigooda ugu galinayaan eXPRS kuwaas oo buuxinaya xaaladaha loo baahan yahay ee ku cad APD-AR-16-044, PSW Ka dhaafidda Galinta Wakhtiga eXPRS(Exception to Time Entry in eXPRS).

Guudmar: Shaqaalaha Kaalmada Shakhsiga ah bixiya(PSW) waxaa laga doonayaa in wakhtiga ay shaqeeyeen ay galiyaan eXPRS.

1. Marka la isticmaalayo EVV, kaasoo waajib ah in la isticmaalo, wakhtiga waxaa si ootamaatik ah loo galinayaa eXPRS waxa kaliya oo PSW-ga laga rabona waa in uu u gubiyo xaalad Aan dhammaystirnayn marka uu diyaar u noqdo in uu gudbiyo warqadda wakhtiga ee waafaqsan. Ka dhaafid kasta oo shuruuddan ah waxaa buuxinaya ODDS si toos ah iyadoo loogu buuxinayo eXPRS.
2. Haddii PSW uusan isticmaalin EVV, waxaa laga doonayaa in uu wakhtigiisa gacanta ku galiyo eXPRS uuna u gudbiyo marxalada Aan dhammaystirnayn kahor inta uusan soo gudbin warqadda wakhtiga ee waafaqsan. Ka dhaafitaanada gudaha ee ay Degmadu samaynayso kaliya waxay suurtogal ka yihiin talaabadaan.

## Goorma ayuu PSW awood u yeelan karaa in uu codsado in laga dhaafo shuruudda?

PSW wuxuu ka codsan karaa ka dhaafitaan Degmada uu degen yahay si uu gacanta ugusoo galiyo wakhtiga eXPRS haddii ay jiraan sababaha soo socda:

1. **Dhibaato kajirta helitaanka adeegga internetka:** Multnomah CME wuxuu ku yaalaa goob leh khadka WiFi oo bilaash ah oo laga heli karo dhammaan aagga magaalada. Sababtanu ma khusayso aagga magaalada Multnomah. Wax ka dhaafid shuruudahan ah lama siin doono.
2. **Arrimo farsamo (aan la xiriirin helitaanka internetka) inta lagu jiro wakhtiga soo gudbinta kuwaas oo ka hor istaagaya in warqadda wakhtiga shaqadu soo gasho eXPRS inta lagu jiro saddexda (3da) maalmood ee la ogolyahay soo galinta.** PSW-yada aan haysan ka dhaafitaanka EVV ma aha kuwo sababtan ka dhaafis ku helaya. Haddii PSW uu muujin karo

arrimo dhanka farsamada ah oo dhacay intii lagu jiray saddexdii (3dii) maalmood oo loo ogolaa soo galinta wakhtiga shaqada, ka dhaafid hal mar ah oo loogu tala galay muddada lacag bixinta gaarka ah ee leh dhibaatada dhanka farsamada ah ayaa la soo saarayaa.

3. **Tani waa warqadda wakhtiga shaqada ugu horeysa ee PSW, PSW-na wuxuu dhammaystiray uuna soo gudbiyay foomka Isdiiwaangelinta Isticmaalaha ee eXPRS, walina aanu helin macluumaadka galitaanka iyo nambarka sirta ah markii la gaaray wakhtigii ugu horeeyay(1aad) ee taariikhda ay ku beegnayd soo galinta wakhtiga lacag qaadashada.** PSW waa in uu muujiyaa in foomka isdiiwaangellinta lasoo gudbiyay. Ka dhaafitaan ayaa loo siin doonaa gudbinta uu soo gudbiyey awgeed wakhtigaa lacag bixineed ee gaarka ah. PSW waa in uu soo gudbiyaa warqadda wakhtiga shaqada oo dhammaystiran (kombuyuutar lagu qoray ama gacanta lagu qoray).
4. **Xirfadda luuqadda Ingiriiska ee PSW ga ayaa caqabad ku noqotay galitaanka eXPRS.** Ka dhaafitaan ayaa la siin doonaa muddo hal (1) sano ah (365 maalmood) laga bilaabo wakhtiga uu codsado. Dhammaan codsiyada ku saabsan sababtaan waa in ay muujiyaan qorshe dhab ah, lana cabiri karo oo ay ku hogaansami doonaan si loo tixgaliyo. Haddii PSW uusan u hogaansamin shuruudaha galinta wakhtiga kahor inta uusan wakhtiga ka dhaafitaanka halka (1) sano ah ka dhammaan, waxaa dhici karta in hal (1) ka dhaafitaan oo dheeraad ah loo tixgaliyo ilaa 90 maalmood laga bilaabo taariikhda uu soo codsado. Ma jiri doonaan ka dhaafitaano kale oo la siin doono.

5. **PSW gu aanu si ku meel gaar ah internet u helayn.** PSW gu waa in uu muujiyaa inaanu heli karin internet, maadaama goobta anteenada CME ay leedahay khad internet oo ah WiFi bilaash aah gobolka oo dhan. Ka dhaafitaan ayaa la siin doonaa kaasoo loogu tala galay soo gudbinta kaliya wakhtigaas lacag bixinta, wuxuuna ku kooban yahay afar (4) sanad kasta.

## Sideen PSW uga caawin karaa helitaanka ka dhaafidda?

Si looga dhaafo isticmaalka EVV si uu u galo ugana baxo marka uu shaqaynayo, SC waa in uu raacaa tilmaamaha kujira Xulashada Kaalmada eXPRS (eXPRS Help Menu) oo kujira qaybta “How to add EVV exception”.

Si uu u helo ka dhaafitaanka galinta wakhtiga gacanta ah ee eXPRS, PSW waa in uu marka koowaad **la yimaadaa qorshe waafaqsan 2019-2021 Heshiiska Gorgortanka ee Wadajirka ah(Collective Bargainin Agreement) (CBA), Qodobka 8aad, Farqada 3aad.** Waxyaabaha ay tahay in laga fakaro marka diyaarinayo qorshe si aad ugu hogaansato diiwaanka shaqo ee shaqo geliyahaaga (EOR) waa:

- Maxaan rabaa in aan u hogaansamo?
- Waa maxay xirfadda aan u bahanahay in aan barto?
- Waa maxay teknoolijiyadda aan u bahaanhaya in aan helo?
- Xageen ka heli karaa macluumaadka aan u bahanahay si aan u buuxiyo shuruuda?
- Yaa iga caawinaya dhammaystirka tababarka iyo helitaanka xirfadda aan u baahanahay?
- Xal ma ii tahay hay’ad arrimahaas ka shaqaysa.

Waa maxay mas’uuliyadaha PSW?

- Samaynta qorshaha si aad ugu hogaansanto diiwaakaaga shaqo galiyaha iyo xaqiijinta in aad u hogaansamayso qorshaha aadna ka shaqaynayso u hogaansamidda.
- Waxaad filataa in EOR kaagu kula shaqeeyo uuna si joogto ah ula socdo horusocodkaaga.
- Waxaad filataa in EOR kaagu kaa caawiyo uuna kaa xaliyo dhibaatooyinka uuna kaa caawiyo helitaanka macluumaadka.

Waa maxay mas'uuliyadaha EOR ka?

- EOR wuxuu la soconayaa horusocodka PSW-ga wuuna taageerayaa marka uu u baahdo asaga oo dib u eegaya talaabooyinka, bixinaya macluumaadka tababarka, ku tababaranaya galinta wakhtiga, iyo wixii lamid ah.
- EOR wuxuu ka warhaynayaa SC haddii macluumaad dheeraad

  ah loo baahdo.

[Foomka Hoose]

## Ka dhaafitaanka shuruudaha Shaqaalaha Kaalmada Shakhsiga ah bixiya (PSW) ee Galinta Wakhtiga Shaqada eXPRS asaga oo Gacanta isticmaalaya: CME-ga Degmada Multnomah

| | |
|---|---|
| **Magaca PSW-ga:** | |
| **Lambarka SPD ee PSW-ga:** | |
| **Muhiimadda(daha) Macmiilka:** | |
| **Iimaylka EOR (waa loo baahan yahay):** | |

**Sababta (WAA IN UU noqdaa mid kamid ah sababaha hoos ku qoran):**

**Qorshaha loo hogaansamayo:**

| |
|---|
| |

Aniga oo hoos saxiixaya, waxaan caddayayaa in aan akhriyay Heshiiska Gorgortanka ee Wadajirka ah(Collective Bargaining Agreement (CBA). Waxaan fahamsanahay in haddii codsigaan ka dhaafitaanka la aqbalo, in ka dhaaftaanku shaqaynayo laga bilaabo taariikhda codsiga ilaa uu ka dhammaanayo wakhtiga kama danbaysta ah ee la i siiyay, waxaana ka shaqaynayaa sidii aan si buuxda ugu hogaansami lahaa inta lagu jiro wakhtigaas.

Mas’uuliyadaha PSW: soo saarista qorshaha waafaqsan EOR iyo ka shaqaynta u hogaansamidda. Waxaad filataa in EOR kaagu kula shaqeeyo uuna si joogto ah ula socdo horusocodkaaga. Waxaad filataa in EOR kaagu kaa caawiyo uuna kaa xaliyo dhibaatooyinka uuna kaa caawiyo helitaanka macluumaadka.

Mas’uuliyadaha EOR (Diiwaanka Shaqo gaiyaha): Wuxuu la soconayaa horusocodka PSW-ga wuuna taageerayaa marka uu u baahdo asaga oo dib u eegaya talaabooyinka, bixinaya macluumaadka tababarka, ku tababaranaya galinta wakhtiga, iyo wixii lamid ah. Wuxuu ka warhaynayaa SC haddii macluumaad dheeraad ah loo baahdo.

| | | | |
|---|---|---|---|
| Saxiixa PSW: | | Taariikhda: | |
| Saxiixa EOR: | | Taariikhda: | |